

K-8 California's  
Istaandarada Manhaj  
Midaysan ee K-8

California

**Buugyaraha  
Waalidka**

**SOMALI VERSION**



Kormeeraha Guud ee Degmada California  
Iskaashiga Adeegyada Waxbarashada

© 2013 Iskaashiga Adeegyada Waxbarashada Kormeerayaasha Guud ee Degmada California

Taageerada Maaliyadeed Waxa Bixiyey  
Ururka The William and Flora Hewlett Foundation

Waaxda Waxbarashada California (CDE) waxay salaam iyo qaddarin u diraysaa Iskaashiga Adeegyada Waxbarashada Kormeerayaasha Guud ee Degmada California (CCSESA) iyo Xafiiska Waxbarashada Degmada Sacramento (SCOE) oggolaanshoogii qiimaha lahaa inay tarjumaan dokumentigan.

Tarjumaaddan waxa loo bixiyey taageero farsamo ahaan dugsiyada, sidaa darteed macalimiintu waxay isticmaali karaan buugyaraha marka ay shirka la qaadanayaan waalidka iyo barnaamijyada adeegyada waalid. Maadaama ay kala duwanaasho jiri karaan tarjumaadda, CDE waxay ku talinaysaa in dugsiyadu ay la shaqeeyaan tarjumaanada deegaanka si ay wax uga beddelaan dokumentiga, marka loo baahdo, si loo leekaysiiyo baahida deegaanka. Su'aalaha kusaabsan tarjumaadda waa in loo diraa Xarunta Dokumentiyada Luuqadaha Badan [cmd@cde.ca.gov](mailto:cmd@cde.ca.gov).

Waxa Diyaariyey:

**Sacramento**  
Office of Education **County**

Waxa Gacan ka Gaystay Patricia Duckhorn, Tamara Wilson, Fran Gibson, Kathy Curl, Sue Stickel, Xafiiska Waxbarashada Degmada California State PTA iyo Ventura

# Tusmada

Horudhac.....	4
---------------	---

## Xisaabta

Xisaabta – Istaandarada Dabbakhaadaha Xisaabeed.....	6
Guudmarka Fasalka K.....	8
Guudmarka Fasalka 1 .....	10
Guudmarka Fasalka 2 .....	12
Guudmarka Fasalka 3 .....	14
Guudmarka Fasalka 4 .....	16
Guudmarka Fasalka 5 .....	18
Guudmarka Fasalka 6 .....	20
Guudmarka Fasalka 7 .....	22
Guudmarka Fasalka 8 .....	24

## Farshaxanada Luuqadda Ingiriisida

Guudmarka Fasalka K.....	26
Guudmarka Fasalka 1 .....	28
Guudmarka Fasalka 2 .....	29
Guudmarka Fasalka 3 .....	31
Guudmarka Fasalka 4 .....	32
Guudmarka Fasalka 5 .....	34
Guudmarka Fasalka 6 .....	36
Guudmarka Fasalka 7 .....	37
Guudmarka Fasalka 8 .....	38

## Horudhac

Buugyarahani wuxuu siinayaa waalidka horudhac Istaandarada Manhaj Midaysan California iyo dulmarka waxa ardayda laga rabo inay bartaan intay kujiraan barbaarinta illaa fasalka 8. Istaandarada waxa loogu talagalay inay muujiyaan aqoonta iyo xirfadaha da'yarteen u baahan yihiin si ay u guulaystaan kuliyaadda iyo xirfadaha. Ahdaaf barasho oo la wada dhigtay waxay ka caawisaa macalimiinta iyo waalidka inay hubiyaan ardayda in la loolan galiyey samaynayaana horumar habboon.

### Maxa lagu falayaa Istaandarada Manhaj Midaysan?

Aqoonyahanada California waxay ku biireen dhaqdhaqaaq qaran si loola qabsado istaandarada guud iyo qiimaynaha Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida iyo xisaabta. Hadda, istaandarada waxa ardaydu ay garanayaan oo ay awoodaan inay sameeyaan waa kala duwan yahay gobolada, sida uu sameeyo adkaanshaha qiimayno lagu go'aansanayey haddii ardaydu ay buuxinayaan istaandaradan. Istaandarro guud waxay saamaxayaan iskaashiga u dhexeeya gobolada ee dabbakhaadaha ugu fiican iyo horumarinta xirfadeed.

Ahdaaf guud oo barasho waxay siiyaan himilo cad waxa aqoonyahanada iyo waalidka gobolada oo dhan ay u dan leeyihiin. Ahdaaftan barasho waxay caawiyaan hubinta in ardaydu buuxiyeen filitaanada kulliyad iyo shaqo, u diyaarsan yihiin guulaystaan dhaqaalaha iyo bulshada adduunka, iyo in la siiyey tusmo cad iyo dabbakhaadda fikirka aqoonta sare. Marka la garab dhigay istaandarada caalamiga ah, Istaandarada Manhaj Midaysan waxay ka caawiyaan ardayda diyaargarawgooda dhammaystirka shuruudaha isqorisa jaamacadda dadwaynaha California.

### La-qabsiga California ee Istaandarada Manhaj Midaysan

Waxa laga hirgeliyey California Ogosto 2010, Istaandarada Gobolka Manhajka Midaysan ee K-12 waxa lagu soosaaray dadaal gobolku hoggaaminayey si loo abuuro istaandarro waxbarasho oo joogto oo cad ee Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida iyo xisaabta. Mashruuca waxa bilaabay oo taageeray Golaha Saraakiisha Madaxa Gobolka Dugsiga iyo Iskaashiga Badhasaabada Qaran. Habka la-qabsiga Istaandarka Manhajka Midaysan, California waxay ku dartay istaandarro taageeris si ay u dhammaystirto sawirka gaarka ah ee ardayda California

Manhajka Midaysan sidoo kale wuxuu ku daray xoog istaandarada California ee jiray isagoo ku daraya istaandarro dheeraad ah ee erayada iyo istaandarro cusub ee wada xaajoodka wadareed. Istaandarada qorista/akhriska kaasi oo shiishka saaraya akhriska iyo qorista ee taariikhda/cilmiga bulshada, sayniska, iyo tiknoolajiga ayaa sidoo kale kujiray. Xisaabta, istaandarro ayaa sidoo kale lagu daray si loo muujiyo awood saaris badan ee lambarrada iyo fikirka aljabra. Fulinta Manhajka Midaysan dugsiyada California wuxuu u dhici marxalado dhawrka sanno ee socda.

### **Ururka Istaandarada**

Buugyarahai wuxuu abaabulaya macluumaad kusaabsan istaandarada farshaxanka luuqadda Ingiriisida iyo xisaabta ee fasal kasta ama koorso laga bilaabo barbaarinta illaa fasalka 8aad. Fasal kasta wuxuu bixiyaa guudmar tusmo iyo dulmar xirfadaha lagu soosaaray heerkaas. Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan heerarka 9-12 waxa lagu bixin doonaa marxaladaha dambe.

Farshaxanka luuqadda Ingiriisida, Istaandarada Midaynta California waxa loo qaybiyey afar tan kooxood: (1) akhriska, (2) qorista, (3) hadalka iyo dhagaysiga, iyo (4) luuqadda.

Marka laga tago iftiiminta istaandarada tasmada xisaabta heerka fasalka ama koorsada, buugyarahani sidoo kale waxa ku qoran dhaqano iyo ku-camalfallo ay tahay arday kastaa inuu la soo baxo kuwaasi oo la dhaho Istaandarada Layliga Xisaabeed. Layliyadani waxay qoto dheereeyaan fahamka xisaabta waxayna xoojiyaan awoodaha dhibaato xallinta ardayda. Macluumaad kusaabsan layliyadan waxay ku yaalaan bogga xiga.

## **Xisaabta | Istaandarada Layliga Xisaabeed**

Istaandarada Layliga Xisaabeed wuxuu sharxaa habdhaqanada ardayda oo dhan ay la soo bixi doonaan Istaandarada Manhajka Midaysan. Layliyadani waxay ahmiyad siiyaan “habsocodyada iyo kufiicnaanshaha” oo ay kujirto xallinta dhibta, sababaynta iyo caddaynta, isgaadhsiinta, u taagnaanta, iyo samaynta xidhiidhada. Layliyadani waxay u saamixi ardayda inay fahmaan oo ku dabbakhaan xisaabta kalsooni.

- Macno u sameeyaan masalooyinka kuna sii socdaan xallintooda.
  - Raadinta macnaha masalooyinka
  - Falanqaynta, saadaalinta iyo qorshaynta dariiqyo xallineed
  - Caddaynta jawaabaha
  - Iswaydiintooda su’aasha: “Tani macno ma samaynaysaa?”
- U sababeeyaan si fikrad ah iyo si tiro ah.
  - Macno u samaynta tirooyinka iyo xidhiidhkooda masalada
  - Abuurista u taagnaanta ishaysata ee masalooyinka
- Dhisaan dood shaqayn karta iyo inay qiimeeyaan sababaynta kuwa kale.
  - Fahmaan oo isticmaalaan macluumaadka si ay u dhisaan doodo
  - Sameeyaan oo baadhaan run ahaanshaha mala-awaalo
  - U cudurdaaraan gabagabada una jawaabaan doodaha kuwa kale
- Sawiraan xisaabta.
  - Ku dabbakhaan xisaabta masalooyinka nolol maalmeedka
  - Aqoonsadaan tirooyinka xaaladaha tooska ah
  - U tarjumaan natiijooyinka xaaladda lagu jiro iyo inay muujiyaan haddii natiijooyinka macno samaynayaan
- U isticmaalaan qalabka habboon si xeeladaysan.
  - Ka fikiraan qalabka yaala marka ay masalooyin xallinayaan

- Bartaan qalabka ku habboon fasalkooda ama koorsadooda (qalin-qori iyo warqad, moodhalada la taaban karo, mastarad, xaglo-cabbire, xisaabiye, isbiriidhshiiit, barnaamijyada kombiyuutarka, kujiraha dhijitaal ee kujira websaytka, iyo qalabka teknoolajiyeed ee kale)
- Hufnaadaan.
  - Ula xidhiidha si hufan dadka kale
  - Isticmaalaan qeexdimo waadax ah, sheegaan macnaha calaamadaha kana taxadaraan cayimista halbeegyada cabbirka iyo dhidibada sumadaynta
  - U xisaabiyaan si sax oo wax-ku-ool ah
- Raadiyaan oo isticmaalaan qaabdhismeedka.
  - Kala soocaan nidaamyada iyo qaabdhismeedkyada
  - Dib u bixin karaan guudmar ahaan dhan kalena ka eegaan
  - U arkaan shayada adag sida walax kaliya ama inay ka kooban tahay dhaw walxood
- Raadiyaan oo aqoonsadaan qaabab ay u abuuraan karin-ka-tuur marka ay qabanayaan masalooyinka.
  - Marka xisaabaha lagu celiyo, raadiya habab guud, nidaamyo iyo karin-ka-tuuryo
  - Awooda qiimaynta haddii jawaabi macno samaynayso

## Guudmarka Fasalka K | Xisaabta


Ardayda barbaarintu waxay bartaan sida loo tiriyo illaa 100 loona qoro illaa 20. Waxa lagu dadaalaa tirooyinka 11-20 halkaas oo xooga la saaro tobnaadka iyo halaadka oo aasaas u noqonaysa fahamka qiime-rugeedka. Bilaabidda isugaynta iyo kala-goyntu waxay ka bilaabantaa barbaarinta. Ardaydu waxay kala soocaan oo kala saaraan kooxaha walxaha oo aqoonsadaan muuqaalada aasaasiga ah.

- Bartaan magacyada tirada oo awoodaan inay tiriyaan illaa 100
- Qoraan tirooyinka 0-20
- Wax ka bartaan 11-20, oo leh tobnaad iyo halaad
- Tiriyaan walxaha si ay u sheegaan tirada shayada koox illaa 20 ah
- Isbarbardhiyaan tirooyinka iyo kooxaha




Kooxdee in badan? Kooxdee inyar?  
kooxahan ma isku midbaa?

- Fahmaan in isu-gayntu tahay wada dhigga kooxa iyo isu-darka kooxaha
- Fahmaan in kala-goyntu tahay kala qaadista kooxaha iyo ka qaadista kooxaha
- Si fiican isugu geeyaan una kala jara illaa 5
- U kala soocaan walxaha kooxo







- Aqoonsadaan oo sharraxaan muuqaalada



(a)



(b)



(c)



(d)

Imisa dhinac iyo imisa koorne ayey muuqaaladani leeyihiin?

Muuqaalkee ayaa leh dhinacyo isleeg?


## Guudmarka Fasalka 1 | Xisaabta

Ardayda fasalka koowaad waxay u fidiyaan fahamkooda isugaynta iyo kala-goynta iyadoo baranaya isticmaalka isugaynta iyo kala-goynta si ay u xalliyaan masalooyinka illaa 20. Waxay fahmaan macnaha calaamadda la-mid ah waxaana laga filayaa inay tiriyaan illaa 120. Aqoonta qiime-rugeedka ayaa la qoto dheeraynayaa ardayduna waxay u isticmaali aqoontan inay isku barbardhigaan lambaro laba qod ah illaa 100. Ardaydu waxay ku isticmaali xirfadaha cabbir cabbirista xariijimaha toosan waxayna ku bilaabi inay abaabulaan xog ka timi xogururin. Ardaydu sidoo kale waxay ku sheegi oo ay qori wakhtiga saacado iyo saacad-badh iyadoo isticmaalaya saacaha wareega iyo kuwa dhijitaalka ah.

- Xalliyaan masalooyinka isugaynta iyo kala-goynta illaa 20
- Fahmaan xidhiidhka ka dhexeeya isugaynta iyo kala-goynta
- Istimaalaa astmaaha xisaab fallada
  - Sifada kala horumarintu ayna beddelayn jawaabta isugaynta:  
Haddaad taqaano  $8 + 3 = 11$ , markaa waad taqaan  $3 + 8 = 11$ .
  - Sifada laba israacinayo ayna beddelayn jawaabta isugaynta:  
Si aan isugu gayno  $2 + 6 + 4$ , labada labada tiro ee labaad ayaa la isu gayn karaa si ay toban u noqdaan, markaa  $2 + 6 + 4 = 2 + 10 = 12$ .
- Isu geeyaan oo kala gooyaan illaa 20
- Tiriyaan illaa 120, oo ka bilaabanta tiro kasta
- Fahmaan macnaha calaamadda la-mid ah
- Fahmaan qiime-rugeedka: halaad, tobnaad
- U isticmaalaa qiime-rugeedka inay isu-geeyaan oo kala-gooyaan illaa 100
- Cabbiraan dhererka kuna sheegaan cabbirka halbeegy
- Sheegaan oo qoraan wakhtiga

Dhisaan oo ka hadlaan garaaf

Waa maxay midabka dallaayadaadu?



Waa maxay midabka ugu caansan ee  
dallaayaddu? Waa maxay midabka ugu  
qariibsan ee dallaayaddu?


- Isbarbardhigaan muuqaalada iyagoo ka hadlaya dhinacyada, geesaha, iwm.
- Isbarbardhigaan muuqaalo laba dhinac-cabbir ah illaa qaar saddex dhinac-cabbir ah

## **Guudmarka Fasalka 2 | Xisaabta**

Ardayda fasalka labaad waxay isticmaalaan isugaynta iyo kala-goynta illaa 100 si ay u xalliyaan masalooyin waxaana laga filayaa inay xafidaan dhammaan wadaraaha lambarada laba hal-godle dhammaadka fasalka labaad. Fahamka qiime-rugeedka waxa loo fidyaa illaa 1000 ardayduna waxay isbarbardhigaan lambarrada saddex god iyadoo ku salaysan aqoontooda boqolaadka, tobnaadka iyo halaadka. Ardayda fasalka labaad waxay xisaabiyaan lacagta waxayna bartaan inay qiimeeyaan oo isbarbardhigaan dhererada iyagoo isticmaalaya qalab cabbirid oo habboon. Ardayda fasalka labaad waxay sifeeyaan fahamkooda joomatariga iyagoo sawiraya muuqaalo kusalaysan tirada wejiyada iyo xaglaha.

- Xalliyaan masalooyinka isugaynta iyo kala-goynta illaa 100
- Si fiican isugu geeyaan una kala gooyaan illaa 20
- Bartaan dhammaan wadaraaha lambarrada laba hal-god
- Fahmaan qiime-rugeedka: halaad, tobnaad, iyo boqolaad
- Isticmaalaan qiime-rugeedka si ay isugu geeyaan una kala gooyaan illaa 1000
- Sameeyaan qiimayno macquul ah iyagoo isticmaalaya aqoonta qiime-rugeedka
- Cabbiraan, qiimeeyaan, iskuna barbardhigaan dhererada halbeegyada istaandarka ah
- U taaga dhererada tiro idil xariiqda tiro
- Ka shaqeeyaan wakhtiga iyo lacagta
- Bartaan xidhiidhka wakhtiga (daqiiqadaha saacadda, maalmaha bisha, wim.)
- Xalliyaan masalooyinka iyagoo isticmaalaya xidhiidhada biilashada doolarka iyo qaddaadiic


- Ururiyaan xog, dhisaan garaaf, kana jawaabaan su'aalaha kusaabsna xogta la soo bandhigay



Waa maxay da'da ugu badan fasalkeena?

Waa maxay da'da ugu yar fasalkeena?

- Aqoonsadaan muuqaalada, saddex xagalada, afar xagalaha, shan xagalaha, lix xagalaha, iyo lix dhinac (cube)
- Sawiraan muuqaalo iyagoo eegaya xajmiga xaglaha ama tirada wejyada isleeg




## Guudmarka Fasalka 3 | Xisaabta

Ardayda fasalka saddexaad waxay lasoo baxaan faham ee isu-dhufashada iyo isu-qaybinta waxayna bartaan inay si fiican isugu dhuftaan isuguna qaybiyaan illaa 100. Ardayda waxa laga filayaa inay xafidsan yihiin dhammaan maxsuulada tirooyinka laba hal-god dhammaadka fasalkan. Fahamka qiime-rugeedka waxa loo isticmaalaa isu-daridda iyo qiimaynaha godadka badan. Jajabyo ayaa la bilaa fasalkan iyadoo awoodda la saarayo fahamka jwabta tiro ahaan iyo waynidooda iyo dhigista xariiqda tirada. Ardayda fasalka saddexaad waxay fahmaan fikradaha bedka iyo wareega waxayna xalliyaan masalooyin iyagoo isticmaalaya mugga iyo cufka dareere.

- Xalliyaan masalooyin isu-dhufasho iyo isu-qaybin
- Fahmaan sifooyinka isu-dhufasho
  - Sifada kala horumarintu ayna beddelayn jawaabta isu-dhufashada:  
Haddaad taqaan  $6 \times 4 = 24$ , markaa waad taqaan  $4 \times 6 = 24$ .
  - Sifada laba israacinayo ayna beddelayn jawaabta isu-dhufasho:  
 $3 \times 5 \times 2$  waxa lagu heli karaa  $3 \times 5 = 15$ , kadib  $15 \times 2 = 30$ ,  
ama  $5 \times 2 = 10$ , kadib  $3 \times 10 = 30$ .
  - Sifada filiqsanaan ee isu-dhufasho:  
 $8 \times 5 = 40$   
iyo  $8 \times 2 = 16$ ,  
kadib  $8 \times 7$  is:  
 $8 \times (5 + 2)$   
 $(8 \times 5) + (8 \times 2)$   
 $40 + 16 = 56$ .

- Si fiican isugu-dhuftaan oo isugu-qaybiyaan illaa 100
- Bartaan dhammaan maxsuulada tirooyinka laba hal-god
- Ku xalliyaan masalooyinka isu-gayn, kala-goyn, isu-dhufasho, iyo isu-qaybin
- Fahmaan in isu-dhufashada iyo isu-qaybintu ay xidhiidhaan
- Isticmaalaan qiime-rugeedka si ay u duubaan tirooyin oo ogaadaan qiimaha god kasta tiro afar-god ah.


- U isticmaalaan fahamka qiima-rugeedka inay ku xalliyaan xisaab godad badan
- U fahmaan jajibta tirooyin ahaan
- Aqoonsadaan jajabyo sahlan oo isu-dhigma
- Isbarbardhigaan laba jajab oo leh sarreeye ama hoose isku mid ah
- Sheegaan oo qoraan wakhtiga daqiiqadda ugu dhaw
- Qiyaasaan oo cabbiraan wakhtiga, mugga, iyo culayska
- Fahmaan bedka iyo wareega
- Fahmaan in muuqaalada kooxo kala duwan sidoo kale ay ku jiri karaan qayb wayn



## Guudmarka Fasalka 4 | Xisaabta

Ardayda fasalka afraad waxay u isticmaalaan aqoontooda qiime-rugeedka inay aragti ka qaataan illaa 1,000,000 una bartaan inay duubaan tiro idil oo godad badan meel kasta. Waxay si fiican isugu-geeyaan una kala-gooyaan iyagoo isticmaalaya loogardamka istaandarka ah isuguna dhuftaan oo qaybiyaan tirooyin godad badan. Ardayda fasalka afraad waxay u fidiyaan fahamka jajabta si ay ugu daraan isu-dhimid, isu-xigsiin iyo jajab tobanle sahlan. Ardaydu waxay cabbiraan xaglaha waxayna ku kala soocaan muuqaalo joomari xariiqo (barbaro, xagal qumman sameeya, iwm.) iyo xaglaha (qumman, fiiqan, daacsan, iwm.)


- Isticmaalaan isugaynta, kala-goynta, isu-dhufashada, iyo isu-qaybinta tirooyin idil si ay u xalliyaan masalooyin
- Wax ka bartaan isirrada iyo dhufsanayaasha
  - Isirrada 24: 1, 2, 3, 4, 6, 8, 12
  - Dhufsanayaasha 4: 4, 8, 12, 16, 20
- Sameeyaan oo sharraxaan nidaamyada leh walxo iyo tirooyin
- Fahmaan oo isticmaalaan qiime-rugeedka si ay aragti uga qaataan 1,000,000
  - Habka fidinta:  $6783 = 6000 + 700 + 80 + 3$
- Isu-daraan tirooyin godod badan
- Xalliyaan masalooyinka ku lugta leh isticmaalka isu-dhufasho iyo tirooyin godad badan oo lagu dhufsto mid laba god
- U qabiyaan tirooyin godad badan qaybshe hal god
- U duubaan tirooyin godad badan meel kasta
- Dhisaan fahamka jajabyada isu-dhigma iyo nidaaminta jajabyada




- Isu-barbardhigaan laba jajab oo leh sarreeyayaal kala duwan iyo hooseeyayaal kala duwan iyagoo u samaynaya hooseeyayaal ay wadaagaan.
- Isu-geeyaan oo kala-gooyaan jajabyada iyo tirooyin isu-dhafan ee leh hooseeyaal isku mid ah.
- Fahmaan u tirada tobanle ee u taagan jajab
- Isbarbardhigaan tobanlayaasha
- Xalliyaan masalooyinka iyagoo isticmaalaya isku beddelka cabbiraadaha



- Isticmaalaan qaacidooyinka bedka iyo wareegga laydiga
- Abaabulaan oo isticmaalaan xogta iyagoo isticmaalaya sawirka xariiq
- Fahmaan oo cabbiraan xaglaha
- Sawiraan oo aqoonsadaan xariijimaha iyo xaglaha
- Sharraxaan oo ku kala soocan muuqaalada xariijimo iyo xaglo



Xaglo Qumman



Xarriijimo Barbarro ah

- Aqoonsadaan xariijimaha dhabanada isku eg

## Guudmarka Fasalka 5 | Xisaabta

Ardayda fasalka shanaad waxay gabagabeeyaan ku fiicnaanshaha isugaynta, kala-goynta, isu-dhufashada, iyo isu-qaybinta godadka badan. Waxay isticmaalaan fahamkooda jajabta ee isugaynta iyo kala-goynta jajabyada leh hooseeyayaal kala duwan, fikradda isu-dhufashada iyo isu-qaybinta jajab, iyo isugaynta iyo kala-goynta tobanle. Waxay falanqayn nidaamyada tiro iyo xidhiidhada iyo lammaanaha tiro ee garaaf ee dhidibada kaartis. Ardaydu waxay dhisi fahamkooda joomatari iyagoo aqoonsanaya sifooyinka muuqaalada joomatari oo xisaabinaya cabbirka xagasha gudaha iyo bedka saddex xagalada iyo baaralelogaraam

- Qoraan oo tarjumaan tibaaxaha tiro iyagoo isticmaalaya qawsas
  - “Isu gee 8 iyo 7, kadib ku dhufo 2” is  $2(8 + 7)$
- U sharraxaan tiro idil  $2 - 50$ ) ahaan maxsuulka isiradeeda mutaxan
- Sharraxaan nidaamyo nidaamyo kakanaan badan iyagoo eegaya isbeddelka

$$\begin{array}{r}
 4 \searrow +6 \\
 10 \searrow +6 \\
 16 \searrow +6 \\
 22 \searrow +6 \\
 28 \searrow +6 \\
 34 \searrow +6 \\
 40 \searrow +6 \\
 46 \searrow +6 \\
 52 \searrow
 \end{array}$$

- Fahmaan nidaamka qiime-rugeedka laga bilaabo kumanaan illaa malaayiin
- Si fiican isugu dhuftaan tirooyin godad badan iyagoo isticmaalaya istaandarka loogardamka
- U qaybiyaan tirooyin godad badan qaybshe laba god
- Akhriyaan, qoraan, oo barbardhigaan tobanlayaasha kumanlayaasha
- U duubaan tobanlayaasha meel kasta
- Ku daraan tirooyin idil oo godad badan iyo tirooyin leh tobanlayaal boqolayaal

$$\begin{array}{r}
 423.12 \\
 \times 8 \\
 \hline
 \end{array}$$


$$\begin{array}{r}
 8943.43 \\
 +17.50 \\
 \hline
 \end{array}$$

$$5 \overline{) 25.75}$$

$$100 - 42.11 =$$

- Isu-geeyaan oo kala-gooyaan jajabyo leh hooseeyayaal kala duwan

- Isu-dhuftaan jajabyada iyo tirooyinka dhafan
- U qaybiyaan halbeega jajabyo tiro idil iyo tiro idil oo ay u qaybiyaan halbeega jajabyo
- Beddelaan cabbiraadaha kuna isticmaalaan xallinta masalada
  - $0.05 \text{ m} = 5 \text{ sm}$  ama  $2.5 \text{ fiit} = 30 \text{ inj}$
- Abaabulaan oo sharraxaan xota iyagoo isticmaalaya sawirka xariiq
- Fahmaan oo raadiyaan mugga manshuur laydiile ah
- Falanqeeyaan nidaamyada tiro
- Dhibco ku sameeyaan dhidibada kaartis



- Ku muujiyaan garaaf dhidibada x iyo y iyadoo dhawr meeloodna la calaamadiyey
- U kala soocaan muuqaalo laba dhinac-cabbir kooxo kusalaysan sifahooga

## Guudmarka Fasalka 6 | Xisaabta


Ardayda fasalka lixaad waxay isticmaalaan aqoontooda isu-dhufasho iyo isu-qaybin si ay u xalliyaan masalooyinka saamiga iyo sicirka. Waxay gabagabayn fahamkooda isu-qaybinta jajabta waxayna bilaabi barashada abyooneyaasha taban. Waxay fahmi isticmaalka doorsoomayaasha tibaaxaha xisaab, qori tibaaxo iyo isleegyo kuwaasi oo u dhigma xaaladaha, waxayna isticmaali tibaaxo iyo isleegyo si ay u xalliyaan masalooyin. Ardaydu waxay bilaabaan barashada xisaabta jaaniska (probability) iyo tirakoobka (statistics) waxayna isticmaalaan aasaaskooda joomatariyeed si ay u xalliyaan masalooyin ku lug leh bedka, oogada bedka, iyo mugga.

- Fahmaan fikradaha saamiga oo isticmaalaan sababaynta saamiga si ay u xalliyaan masalooyin
- Fahmaan sicirka halbeega
- Raadiyaan boqolkiiba inta tiro ay ka tahay
- Isu-qaybiyaan jajabyo
- Si fiican iskugu daraan tirooyin godad badan iyo tobanlayaal godad badan
- Raadiyaan isirro iyo dhufsanayaal ay wadaagaan tirooyinku
- Raadiyaan isir waynaha ay wadaagaan iyo dhufsana yaraha ay wadaagaan laba tiro oo idil
- Isticmaalaan fahamka tirooyin togan si ay u fahmaan tirooyinka buuxa
- Fahmaan abyooneyaasha togan iyo kuwa taban oo ay awoodaan inay dhigaan afarta qaybood ee dhidibada kaartis
- Nidaamiyaan tirooyinka buuxa
- Fahmaan qiimaha sugan
- Isticmaalaan fahamka xisaabta si ay u xalliyaan isleegta hal isleeg iyo isma-leekayaasha
- Qoraan tibaaxyo iyo isleegyo si ay u sharraxaan xaaladaha dhabta ah iyagoo isticmaalaya doorsoomayaal
- Qoraan oo xalliyaan isleegyada leh jibbaaro tiro idil
- Qoraan isma-leeg si ay u sharraxaan dhabta ama masalo xisaab
- U taagaan sharxaanna xidhiidhada ka dhexeeya doorsoomayaasha aan madaxbannaanayn iyo kuwa madaxbannaan

Tusaale ahaan, baabuur ayaa ku socda xawaare joogto ah 65 mayl saacaddii. Wax oo sawir tirooyin isku lammaan ee masaafadda iyo wakhtiga. Qof isleegta  $d = 65t$  si ay kuu tusiso masaafadda uu socday (d) inay ku tiirsan tahay xawaaraha joogtada ah (65) oo lagu dhuftay wakhtiga uu socday.

$$d = 65t$$

t=saacado	masaafad
1	65
2	130
1/2	32.5



- Xalliyaan masalooyinka dhabta ah ee ku lugta leh bed, oogada bed, iyo mug
- Waydiiyaan su'aalo tirakoob (Waa imisa jir ardayda dugsigayga?), ku ururiyaan oo abaabulaan xogta sawir xariiq, garaaf, histogaraam, sawirka dhibic, sawirka saxarad, iwm.
- Sharraxaan oo soo koobaan xogta iyagoo ogaanaya badhtanka, faafista, iyo muuqaalka guud
- Ku muujiyaan xog tireed xariiq tiro oo ay kujiraan sawirrada dhibic, histogaraam, iyo sawirrada saxarad

## Guudmarka Fasalka 7 | Xisaabta

Ardayda fasalka toddobaad waxay sii qoto dheereeyaan fahamkooda xidhiidhka saamiyeed si ay u xalliyaan masalooyin adag. Waxay ku fidiyaan fahamkooda tirooyinka buuxa si ay ugu daraan xisaabinta (isku-dar, kala-goo, isu-dhufo, iyo isu-qaybi). Tirooyinka aan buuxin ayaa lagu bilaabaa fasalka toddobaad. Aasaaska aljabra ayaa la isticmaalaa oo la fidiyaa. Ardaydu waxay sii wadaan fidinta fahamkooda xisaab jaaniska iyo xisaab tirakoobka iyagoo sharxaya kooxaha kusalaysan muunad ka qaadasho, oo baadha fursadda ay ku horumariyaan, isticmaalaan, kuna qiimeeyaan moodhalada xisaab jaanista.

- Isticmaalaan xidhiidhada saamiyeed si ay u xalliyaan xisaab tallaabooyin badan iyo masalooyinka boqolay
  - Haddii qofi lugeeyo  $\frac{1}{2}$  mayl  $\frac{1}{4}$  saac kasta, waa maxay xawaarihiisa saacaddii?
- Xisaabiyaan halbeega sicir
- Isu-geeyaan, kala-gooyaan, isu-dhuftaan, oo isu-qaybiyaan tirooyinka buuxa
- U beddelaan jajabyada tobanlayaal.
- Xalliyaan xisaabo tallaabooyin badan leh oo tirooyin togan iyo tabanba leh.
- Heerkulku waa – 10 digrii 6:00 GD. Haddii heerkulku hoos u dhacay 5 digrii laba saac, waa maxay heerkulka 8:00 GD?
- Isticmaalaan sifooyinka xifaasfallada si ay u xalliyaan isleegyada aljabra
- Isu-geeyaan, kala-gooyaan, isireeyaan, oo fidiyaan tibaaxaha toosan
- Isticmaalaan doorsoomayaal si ay ugu taagnaadaan tirooyinka xisaabaha dhabta ah.
- Dhisaan isleeyo iyo isma leeyo sahlan si ay u xalliyaan masalooyin
- Sawiraan, dhisaan, oo sharxaan sawirrada joomatari oo sharxaan xidhiidhada ka dhexeeya iyaga
- Xalliyaan masalooyin ku lug leh cabbirka xagal, bed, bedka oogo, iyo mug (dhululuboooyinka, kooniska, iyo isfeerada)
- Xalliyaan masalooyinka nolosha dhabta ah ee mugga dhululubada, kooniska, iyo isfeerada.
- Yaqaanaan qaaciidooyinka beddka iyo wareega goobo
- Isticmaalaan xaglaha lammaan, is-dhammaysitra, taagan, iyo xaglaha isku qabsan si ay u xalliyaan masalooyin tallaabooyin badan.
- Isticmaalaan muunad qaadashada nasiibka si u sharxaan isuna barbardhigaan kooxaha

Raadiyaan, xisaabiyaan, oo sharxaan fursadda dhacdo xisaab jaanis

- Tusaale ahaan, haddii arday laga soo doorto fasal, raadi jaaniska Jane lagu dooranayo iyo jaaniska gabadh lagu dooranayo.

T11-407 – Somali – Arial font  
39 pages

- Ama haddii 40% ku-deeqayaashu ay leeyihiin nooca dhiiga A, waa maxay jaaniska in ay ku qaadan doonto ugu yaraan 4 ku-deeqe inay helaan mid leh dhiiga nooca A?

## Guudmarka Fasalka 8 | Xisaabta

Ardayda fasalka sideed waxay sii qoto dheereeyaan fahamkooda tirooyinka buuxa iyo tirooyinka aan buuxin. Aljebra ahaan, ardaydu waxay ka shaqeeyaan xididka iyo jibbaarada, xalliyaan isleegyo qumman oo qeexaan, xalliyaan, isbarbardhigaan, oo sawiraan fakshanada. Joomatariga, ardayda fasalka toddobaad wuxu fahmaa oo isticmaalaa Aragtida Baytagaroos waxaanu xalliyaan masalooyinka ku lugta leh mugagga iyo dhululubooyinka, kooniska, iyo isfeerada.

- Fahmaan tirooyinka buuxa iyo kuwa aan buuxin

U aqoonso tiro kasta inay tahay tiro buuxda ama tiro aan buuxin:

$\sqrt{18}$	aan buuxin, sababtoo ah 18 ma aha laba jibbaar sax ah
$\sqrt{64}$	buuxda, sababtoo ah 64 waa laba jibbaar sax ah
$-\sqrt{47}$	aan buuxin, sababtoo ah 47 ma aha laba jibbaar sax ah
135.6	buuxda, sababtoo ah waa tobanle dhammaad leh
0.2525...	buuxda, sababtoo ah waa tobanle soo noqnoqda
0.120120012...	aan buuxin, sababtoo ah ma dhammaato mana soo noqnoqto
$\frac{1}{2}$	buuxda, sababtoo ah looma dhigi karo $a/b$ , halka $a$ iyo $b$ ay yihiin abyoonayaal

- Ka shaqeeyaan xididka iyo abyoonaha jibbaarka ah
  - Tusaale ahaan, ku qiyaasaan dadwaynaha Maraykanka  $3 \times 10^8$  dadwaynaha adduunkana  $7 \times 10^9$ , oo go'aamiyaan in dadwaynaha adduunku 20 jeer badan yahay.
- Fahmaan xidhiidhka ka dhexeeya xidhiidhada saami, xariiqo, iyo isleeg qumman oo awoodaan inay garaaf ku muujiyaan
- Fahmaan in hal ku beega xidhiidhka saami uu yahay jirada garaafka
- Isticmaalaan saddex xagalo isk-shabbaha si ay u sharxaan jirada oo fahmaan  $y = mx + b$
- Falanqeeyaan oo xalliyaan isleegyo qumman oo leh hal doorsoome iyo lammaane isleegyo wadajira oo qumman
- Qeexaan, xalliyaan, oo isbarbardhigaan fakshanada
- Fahmaan in fakshan ay tahay xeer lammaanaha is-wataana ay yihiin wixii la galinayey iyo wixii soo baxayey
- Dhisaan oo isticmaalaan fakshano si ay u qaabeeyaan xidhiidho
- Fahmaan isleegkaanshaha iyo is-shabbaha



T11-407 – Somali – Arial font  
39 pages

- Fahmaan, isticmaalaan, oo dabbakhaan Aragtida Baytagaros
- Baadhaan nidaamyada kooxo xog ah
- Dhisaan oo tarjumaan sawirrada firidhsan
- Xalliyaan masalooyinka ku lugta leh mugagga dhululubooyinka, kooniska, iyo isfeerada  
Dhisaan oo tarjumaan sawirro firidhsan


## Guudmarka Fasalka K | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida

Ardayda barbaarintu waxay ka shaqeeyaan xoojin iyo taageerid si ay ula falgalaan suugaanta ama qoraalka macluumaad iyagoo waydiinaya oo ka jawaabaya su'aalo aqoonsanayana tafaasiisha iyo dhacdooyinka waawayn. Arday way yaqaanaan oo magacaabi karaan dhammaan xarfaha, waxayna qori karaan magacyo badan. Waxay akhriyaan karaan erayada caanka ah oo sawiri karaan, wax ka sheegaan ama qoraan buug.

### Akhrinta

#### Boorin iyo taageero:

- Waydiiyaan oo ka jawaabaan su'aalo kusaabsan xulasho akhris
- Aqoonsadaan sifooyinka, xaaladda, iyo dhacdooyinka waawayn ee sheeko
- Dub u sheegeen sheekooyinka, oo ay kujiraan tafaasiiluhu



#### Akhrinta: Xirfadaha Aasaasiyeed

- Fahmaan muuqaalada qoris ee aasaasiga ah
  - Bidix illaa midig
  - Sare illaa hoos
  - Bog-bog
- Aqoonsadaan oo magacaabaan dhammaan xarfaha waawayn iyo kuwa yaryar
- Aqoonsadaan in erayada lagu hadlaa ay ka kooban yihiin dhawaaqyo iyo codad
- Aqoonsadaan oo sameeyaan erayo isku jib ah
- Isdhexgaliyaan laba ama saddex cod si wada jir ah si ay u sameeyaan eray la garan karo
- Isticmaalaan codadka marka ay akhrinayaan erayada
- Dhalashaan codadka ugu badan shiibane iyo shaqal kasta
- Ku akhriyaan erayada caanka ah ee hirka sare arag
  - The, of, to, you, is

### Qorista

- Sawiraan, sheegaan, ama wax ka qoraan buug
- Sawiraan, sheegaan, ama wax ka qoraan dhacdooyin sida ay isugu xigeen


### Hadalka iyo Dhagaysiga

- Kaqaybqaataan falanqaynaha
  - Dhagaystaan dadka kale
  - Qaataan hadalka markooda
- Raacaan tilmaamaha hadal
- Waydiiyaan oo kajawaabaan su'aalaha
- Sharraxaan dadka, goobaha, shayada, iyo dhacdooyinka, bixinta tafaasiil

### Luuqadda

- Qoraan xarfo badan oo kuwa waawayn iyo kuwa yaryarba ah
- Isticmaalaan xaraf waynaynta, xarakaynta, iyo higaadinta
- Aqoonsadaan macnayaal cusub ee erayada ay yaqaanaan
  - Yaqaan *duck* inay shimbir tahay, iyo barashada ficilka *duck*

- U kala socaan walxaha caadiga ah kooxo
  - Qaabab, cunto



## Guudmarka Fasalka 1 | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida

Ardayda fasalka koowaad si madaxbannaan ayey ula falgalaan suugaanta iyo qoraalka macluumaad iyagoo waydiinaya kana jawaabaya su'aalo oo aqoonsanayana tafaasiisha iyo dhacdooyinka muhiimka ah. Waxay si sare wax ugu akhriyi karaan si sax ah oo leh tilmaam. Ardayda fasalka koowaad way qori karan xarfaha oo dhan waxayna wax ka qori karaan dhacdooyinka, mawduucyada, iyo fikradaha.

### Akhrinta

- Waydiiyaan oo ka jawaabaan su'aalo kusaabsan tafaasiisha xulasho akhriin
- Dib u sheegeen sheekooyinka, oo ay kujirto tafaasiisha
- Sharraxaan faraqyada u dhexeeya buugaagta kuwaasi oo sheekada ah iyo kuwa macluumaadka ah
- Dhiirigalin iyo taageero, akhriyaan qoraal macluumaadka fasalka koowaad

### Akhrinta: Xirfadaha Aasaasiyeed

- Fahmaan abaabulka iyo muuqaalada aasaasiga ah ee qorista
- Aqoonsadaan muuqaalada weedho
  - Xarfo waynayn
  - Xarakada dhammaadka
- Fahmaan erayada lagu hadlo, dhawaaqyada, iyo codadka
- Fahmaan codadka iyo falanqaynta erayga
  - Yaqaanaan in dhawaaq kastaa uu leeyahay cod shaqan
- Akhriyaan erayada sida joogtada loo higgsadiyo hal iyo laba dhawaaq
- Sare ugu akhriya si sax ah oo tilmaam ah

### Qorista

- Qoraan qaybaha fikradda kuwaasi oo ay kamid yihiin fikrad iyo sababta fikradda
- Qoraan qaybo wargelineed kuwaasi oo magacaaba mawduuc, dhiiba xaqiiqooyin, bixiyana gabagabo
- Qoraan sheekooyin qiyaastii laba ama kabadan dhacdo qaabka ay isugu xigaan; ku daraan tafaasiil

### Hadalka iyo Dhagaysiga

- Raacaan xeerarka falanqaynta iyagoo ku salaynaya waxa dadka kale leeyihiin iyo iyagoo su'aalo waydiinaya
- Raacaan tilmaamo laba tallaabo ah oo sahlan
- Ku hadlan weedho dhammaystiran

### Luuqadda

- Isticmaalaan naxwe sax ah
- Qoraan dhammaan xarfaha waawayn iyo kuwa yarar
- Isticmaalaan xarfo waynayn, xarakayn, iyo higgsaadin sax ah
- Go'aamiyaan macnaha erayada ayna garanayn iyagoo eegaya qaybaha erayga iyo erayada kale ee weedha
- U kala soocaa erayada kooxo kuna qeexaan erayda aqoonsiyada
  - Shabeel waa bisad wayn oo harhariir leh

## Guudmarka Fasalka 2 | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida

Ardayda fasalka labaad waxay si sax ah u akhriyaan una fahmaan qoraalka macluumaad iyo suugaan. Waxay isticmaalaan naxwe sax ah, xarfo waynayn, xarakayn, iyo higgadin. Waxay qorshayn karaan oo keeni karan soojeedimo kusaabsan sheeko ama waayo-aragnimo.

### Akhrinta

- Dib u sheegaan sheeko xariirada, oo ay kujiraan cashar badh ah
- Retell folktales, including a central lesson
- Sharxaan sida qoraagu u isticmaalo sababo si uu u taageero qodobu gaar ah oo qoraalka kujira
- Aqoonsadaan macduuca guud iyo ujeedka
- Akhriyaan oo fahmaan suugaanka iyo qoraalka macluumaad

### Akhrinta: Xirfadaha Aasaasiyeed

- Yaqaanaan oo isticmaalaan codadka iyo xirfadaha falanqaynta erayada
  - Arkhriyaan erayada leh horgalayaal iyo dabagalayaal guud (*tus., re\_, un\_, \_less*)
- Kala saaraan shaqalada dhaadheer iyo kuwa gaagaaban
- Akhriyaan erayada labada dhawaan ee si joogto ah loo higgadiyo eel eh shaqalada dhaadheer
- U akhriyaan si sax ah oo faham leh

### Qorista

- Qoraan qaybo fikrad ah kuwaasi oo ku xidha fikradda sababa iyagoo isticmaalaya erayo isku xidhe.
  - Waayo, iyo misana
- Qoraal qaybo wargelin ah kuwaasi oo bixinaya mawduuc, xaqiiqooyin, qeexdimu, iyo gabagabo
- Qoraan qaybo sheeko ah kuwaasi oo ay kujiraan tafaasiil si ay u sharxaan ficilo, fikrado, iyo dareeno
- Soosaaraan qoraal kaasi oo horumarsan, ujeedaysan, oo abaabulan
- Si joogto ah u qoraan wakhti dhaadheer iyo wakhtiyo gaagaaban.

### Hadalka iyo Dhagaysiga

- Kaqaybqaataan la sheekaysiga asxaabta iyo qaangaarka kooxo yaryar iyo kooxo waawaynba
- Xasuustaan oo sharxaan fikradaha muhiimka ah iyo tafaasiisha wax si sare loo akhriyey
- Bixiyaan oo raacaan tilmaamaha hadalka saddex iyo afarta ah
- Qorsheeyaan oo keenaan soojeedin kusaabsan sheeko ama waayo-aragnimo

### Luuqadda

- Istimmaalaan naxwe sax ah
- Abuuraan dokumentiyo la akhriyi karo oo leh far la fahmi karo
- Istimmaalaan xarfo waynayn, xarakayn, iyo higgadin sax ah
- Istimmaalaan habab kala duwan si ay u go'aamiyaan macnaha erayga
- Istimmaalaan erayada midmid si ay u go'aamiyaan macnaha erayo isku dhisan, kuwaasi oo ah laba eray oo la isku xidhay si ay u sameeyaan eray cusub

míis      maro  
    ↓      ↓  
marada míiska

dhalasho      maalin  
    ↓      ↓  
maalinta dhalashada

## Guudmarka Fasalka 3 | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida

Ardayda fasalka saddexaad waxay ula falgalaan suugaanta iyo qoraalka macluumaad iyagoo isbarbardhigaya iska horkeenaya sheekooyinka, ka xaajoonaya aragti oo barbardhigaya qoraaga, oo shaxyana dhacdooyin, ama fikrado taxan. Akhriskooda ka sokow, qorista fasalka saddexaad waa adag tahay. Ardaydu waxay soosaaraan shaqo horumarsan, ujeedaysan, abaabulan, oo bilaa saxar ah. Qorista qoraalka wargelineed, waxay ku daraan shaxano ama garaafyo waxayna raaciyaan xaqiiqooyin.

### Akrinta

- Sharxaan sida ficilada dabecaddu dhacdooyinka u saameeyaan
- Isbarbardhigaan oo iska horkeenaan sheekooyinka
- Si madaxbannaan u akhriya una fahma suugaanta heerka fasalka
- Sharxaan dhacdooyin, ama fikrado taxan
- Ka hadlaan fikrad oo oo barbardhigaan taas qoraaga

### Akhrinta: Xirfadaha Aasaasiyeed

- Isticmaalaan codadka heerka fasal iyo xirfadaha falanqaynta erayga
  - Akhriya erayad dhawaaqyada badan sida, mosquito, puppeteer
- Yaqaanaan macnayaasha horgalayaasha iyo dabagalayaasha badankooda
- U akhriyaan si sax ah oo faham leh

### Qorista

- Qoraan qaybo fikrado ah kuwaasi oo ay kujiraan shaxano ama garaafyo taxana sababta taageeraya fikradda
- Qoraaan qaybo wargelineed kuwaasi oo magacaabaya mawduuca, xaqiiqo bixinaya, oo isticmaalaan erayo iyo odhaaho isku-xidhaha
- Qoraan qaybo sheeko ah kuwaasi oo sheegaya sheekeeye iyo jilayaal, waxna ka qoraan waxa jilayaashu dhahaan, ka fikiraan, ama dareemaan.
- Soosaaraan qoraal kaasi oo hormarsan, ujeedaysan, abaabulan, oo bilaa saxar ah

### Hadalka iyo Dhagaysiga

- Raacaan xeerarka falanqaynta iyagoo ku dhisaya waxa kuwa kale dhahayaan
- Xasuustaan fikradaha iyo tafaasiisha wax sare loo akhriyey
- Qorsheeyaan oo keenaan soojeedin wargelineed
- Si u haddlaan iyo weedho dhammaystiran

### luuqadda

- Isticmaalaan naxwesi sax ah
- Qoraan far isku dardarsan oo la fahmi karo; isticmaalaan xadad iyo bannaan bixis
- U doortaan erayda iyo odhaahaha saamayn ahaan
- Isticmaalaan nooc weedho ah oo kala duwan
- Waaweyneeyaan erayda habboon
- Si sax ugu geeyaan dabagale eray saleedka
  - Sitting, smiled, cries
- Aqoonsadaan faraqa u dhexeeya Ingiriisida istaandarka ah ee qoran iyo kan lagu hadlo

## Guudmarka Fasalka 4 | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida

Ardayda fasalka afraad waxay akhriyaan erayo dhaadheer waxayna isticmaalaan xididada, horgalayaasha, iyo dabagalayaasha si ay u go'aansadaan macnaha erayada aanay garanayn. Waxay isticmaalaan tafaasiil iyo tusaalayaal qoraalka si ay u go'aansadaan fikradda wayn oo sharxaan sifada, xaaladda, ama dhacdada. Ardaydu waxay soosaaraan qoraal kaasi oo horumarsan, ujeedaysan, abaabulan, oo bilaa saxar ah. Waxay ku kooxeeyaan afkaarta xidhiidha baaragaraafyo iyo qaybo, waxayna dhigaan gunaanad. Ardayda fasalka afraad waxay yaqaanaan marka ay tahay in la isticmaalo Ingiriisida rasmiga ah, iyo marka Ingiriisida aan rasmiga ahayn uu habboon yahay.

### Akhrinta

- Isticmaalaan tafaasiil iyo tusaalayaal qoraalka si ay u go'aamiyaan fikradda wayn una sharxaan dabeec, xaalad, ama dhacdo.
- Isticmaalaan qaabka sheekaynta magaca hore (sida, *I said*) iyo ka saddexaad (sida, *She said*)
- Akhriyaan oo fahmaan suugaanta iyo qoraalka macluumaad

### Akhrinta: Xirfadaha Aasaasiyeed

- Isticmaalaan codadka heerka fasal iyo xirfadaha falanqaynta erayga
  - Roots, prefixes, and suffixes
- Akhriyaan erayada leh dhawaaqyo badan
- Ku akhriyaan saxsanaan iyo faham

### Qoraalka

- Qoraan qaybo fikrad ah kuwaaso oo ay kujiraan gunaanad la xidhiidha fikradda
- Qoraan qaybo wargelin ah kaasi oo ku kooxeeya fikradaha xidhiidha baaragaraafyo iyo qaybo, dhiibana gunaanad
- Qoraan sheekooyin kuwaasi oo ku bilaabma sheekeeye iyo jilayaal; wax ka qoraan waxa jilayaashu dhahayaan, dareemayaan, una fakarayaan; isticmaalaan macluumaadka dareenka
  - Sight, sound, scent
- Soosaaraan qoraal kaasi oo horumarsan, ujeedaysan, abaabulan, oo bilaa saxar ah
- Qoraan qayb cilmi-baadhis oo gaaban

### Hadalka iyo Dhagaysiga

- Kaqaybqaataan falanqaynaha, fuliyaan doorar loo xilsaaray
- Qoraalo ka samaystaan macluumaad sare loogu dhawaaqayo
- Qorsheeyaan oo keenaan soojeedin kusalaysan waayo-aragnimada qof ahaaneed
- U hadlaan si cad, weedho dhammaystiran, iyo heer habboon

### Luuqadda

- Isticmaalaan naxwe sax ah
- Isticmaalaan weedho dhammaystiran
- Si sax u isticmaalaan erayada inta badan la isku khaldo
  - To, two, too
  - There, their, they're



T11-407 – Somali – Arial font  
39 pages

- Isticmaalaan xarfo waawaynayn, xarakayn, iyo higgaadin sax ah
- Higgaadiyaan erayda heerka fasalka si sax ah
- Yaqaanaan marka la isticmaalayo Ingiriisida Rasmiga ah iyo marka Ingiriisida aab rasmiga ahayn ay habboon tahay

## Guudmarka Fasalka 5 | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida

Ardayda fasalka shanaad waxay awooda saaraan akhrinta erayo dhaadheer, iyadoo isticmaalaya xidido, horgalayaal, iyo dabagalayaal si ay u go'aamiyaan macnaha erayo aanay ganayn. Ardaydu waxay sharxaan sida qoraa u taageero qodobo qoraal kujira. Waxay isticmaalaan xigashooyin si sax ah markay tixraacayaan qoraalka. Ardaydu waxay maskaxda ku hayaan daalacdayaasha waxayna ku daraan dhacdooyin isku xigxiga oo cad markay qorayaan. Ardaydu waxay dhagaystaan hadle ama warbaahin waxayna aqoonsadaan sababaha iyo caddaymaha la bixiyey si ay u taageeraan meelo gaar ah. Waxay aqoonsadaan oo falanqeeyaan fikradaha marinhabaabinta ah.

### Akhrinta

- U xigtaan si sax ah markay tixraacayaan qoraal
- Go'aamiyaan fikradda wayn oo soo koobaan qoraalka
- Isbarbardhigaan oo iska horkeenaan qoraalada
- Sharraxaan sida qoraa u isticmaalo sababta ama caddayn si uu u taageero qodobo kujira qoraal

### Akhrinta: Xirfadaha Aasaasiyeed

- Isticmaalaan codadka heerka fasal iyo xirfadaha falanqaynta erayga
  - Roots, prefixes, and suffixes
- U akhriyaan si sax ah oo fiican

### Qoraalka

- Qoraan qaybo fikrad ah kuwaaso oo ku taageeraya fikrad sababo iyo macluumaad
- Qoraan qoraal wargelin kaasi ooy ku wadaan fikradaha iyo macluumaadka
- Qoraan sheekooyin kuwaasi oo isticmaalaa sharraxe xidhiidha iyo isku xigxig cad oo dhacdooyinka ah
- U qoraan si cad oo ujeedo leh; maskaxda ku hayaan daalacdayaasha
- Isticmaalaan tiknoolaji si ay u daabacaan qoraal; u garaacaan laba bog kali fadhi

### Hadalka iyo Dhagaysiga

- Soo koobaan macluumaadka la soojeediyey
- Aqoonsadaan sababo iyo caddayn hadle ama warbaahin bixiyey si ay u taageeraan qodobo gaar ah
- Aqoonsadaan kana xaajodaan fikradaha marinhabaabinta ah
- Qorsheeyaan oo keenaan hadal
- Keenaan gabay la xafiday ama qayb hadal kamid ah
- Isticmaalaan tilmaamo iyo jidh ka hadal

### Luuqadda

- Isticmaalaan naxe sax ah
- Isticmaalaan aminaha ficilka si sax ah
  - Yesterday I *walked*
  - Today I *walk*
  - Tomorrow I *will walk*
- Isticmaalaan xarfo waawaynayn, xarakayn, iyo higgsaadin sax ah
- Isticmaalaan xarakayn si ay u kala soocaan shayada si taxane/liis ah

T11-407 – Somali – Arial font  
39 pages

- Isticmaalaan hoos ka xariiq, qaws sare, ama farta jifta cinwaan
- Kala duwaan dhererka iyo qaabka weedha
- Isbarbardhigaan oo iska horkeenaan qaababka la isticmaalo suugaanta
- Isticmaalaan qaabab kala duwan si ay u go'aamiyaan macnaha eray aan la garanayn

## Guudmarka Fasalka 6 | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida

Ardayda fasalka lixaad waxay bixiyaan soo koobis akhris iyadoon qofna fikrad ka dhiiban. Waxay qoraan qaybo kala duwan, oo ay kujiraan mashaariic cilmi-baadhis, waxayna isticmaalaan teknoolaji si ay u soosaaraan shaqada. Markay ay soojeedinayaan, ardaydu waxay dhigaan sharraxaado, xaqiiqooyin, iyo tafaasiil nidaamka macquul ah.

### Akhrinta

- Go'aansadaan fikradda wayn iyo tafaasiisha taageeraysa
- Bixiyaan soo koobis la'aanta fikradaha qof ahaaneed
- Go'aamiyaan sida qaabdhismeedka qoraal uu wax ugu kordhiyo fikradda wayn
- Go'aamiyaan fikradda qoraa
- Sharraxaan sida aragtida sheekeeye ama hadle loo soosaaray
- Kala saaraan xaqiiq, fikrad, go'aan la sababeeyey, iyo ku-tidhi-ku-teen qoraal kujira
- Akhriyaan oo fahmaan qoraalka khuraafaadka ah iyo kuwa aan ahayn heerka fasalka

### Qorista

- Qoraan doodo si ay u taageeraan sheegashooyin leh asbaabo cadcad iyo caddayn la xidhiidha
- Qoraan qoraal wargelin kaasi oo baadha mawduuc oo sharraxa afkaar
- Qoraan sheekooyin kuwaasi oo ay kujiraan sharraad la xidhiidha iyo isku xigxig dhacdo oo si fiican loo dhisay
- Tabiyaan mashaariic cilmi-baadhis oo gaagaaban oo dib ugu jeestaan waydiinta marka loo baahdo
- Isticmaalaan tiknoolaji si ay u soosaaraan una daabacaan qoraal; ku daabacaan saddex bog hal fadhi

### Hadalka iyo Dhagaysiga

- Kaqaybqaataan falanqaynta, hal-halka iyo kooxda
- Raadiyaan sheegashooyin ay taageeraan sababo iyo caddaymo dooda hadlaha
- Qorsheeyaan oo keenaan soojeedin wargelin
- U dhigaan qaab macquul ah sharraxaadaha, xaqiiqaha, iyo tafaasiisha markay soojeedinayaan

### Luuqadda

- Isticmaalaan naxwaha iyo luuqadda si sax ah
- Isticmaalaan xarfo waawaynayn, xarakayn, iyo higgsaadin sax ah
- Isticmaalaan qaabab kala duwan si ay u go'aamiyaan macnaha eray aan la garanayn
- Kala saaraan erayada isku macnaha ah
  - Stingy, economical, thrifty

## Guudmarka Fasalka 7 | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida

Ardayda fasalka toddobaad waa akhriyaan oo fahmaan suugaanta aan khayaalka ahayn heerka fasalka. Waxay isbarbardhigaan oo iska horkeenaan waxyaabaha khayaalka ah iyo waxyaalaha taariikhda ah. Ardaydu waxay qoraan qaybo kala duwan, iyagoo abuuraya doodo abaabulan si ay u taageeraan sheegashooyin. Marka qorista mashaariic cilmi-baadhis, ardaydu waxay ururiyaan su'aalo dheeraad ah si ay u sameeyaan cilmi-baadhis dheeraad ah. Waxay isticmaalaan isha-isha saar, mug habboon, iyo ku dhawaaqid sax ah markay soojeedinayaan.

### akhrinta

- Sharraxaan waxa qoraalku sheegayo oo gunaanadna u sameeyaan
- Go'aamiyaan fikradda wayn ee qoraal iyo sida ay u soosaaraan
- Falanqeeyaan sida qaybaha ama aasaaska sheeko u qaabeeyo sawirka
- Falanqeeyaan sida qoraa u soosaaro ugana hor keeno fikraddiisa kuwa jilayaasha ama sheekeeyaha
- Falanqeeyaan qaabdhismeedka qoraal
  - Garaafikis, cinwaano, iyo qoraalka hoose
- Isbarbardhigaan oo iska horkeenaan waxyaalaha khuraafaadka ah iyo kuwa taariikhda
- Qiimeeyaan illaa xadka sababaynta iyo caddaynta qoraal ay taageeraan sheegashooyinka qoraaga
- Akhriyaan oo fahmaan qoraalka khuraafaadka iyo kuwa aan khuraafaadka ahayn heerka fasalka

### Qorista

- Qoraan doodo si ay u taageeraan sheegashooyin leh sababo cad iyo caddaymo la xidhiidha
- Qoraan qoraal wargelin kaasi oo baadha mawduuc oo sharraxa afkaar
- Qoraan sheekooyin kuwaasi oo ay kujiraan sharrad la xidhiidha iyo isku xigxig dhacdo oo si fiican loo dhisay
- Tabiyaan mashaariic cilmi-baadhis oo muujiyaan faham mawduuca la baadhayo
- Istimaaalaan tiknoolaji si ay u soosaaraan una daabacaan qoraal; oo ay kujirto tixraacyada iyo xidhiidhada ilaha

### Hadalka iyo Dhagaysiga

- Kaqaybqaataan falanqaynta, hal-halka iyo kooxda
- Qiimeeyaan sababaynta iyo ku tacaluqa caddayn lagu sameeyey dooda hadlaha
- Qorsheeyaan oo keenaan soojeedin dood
- Istimaaalaan isha-sha u saar, mug habboon, iyo ku dhawaaq cad marka soojeedinta

### Luuqadda

- Istimaaalaan naxwaha iyo luuqadda sax ah
- Istimaaalaan xarfo waawaynayn, xarakayn, iyo higgsaadin sax ah
- Istimaaalaan qaabab kala duwan si ay u go'aamiyaan macnaha eray aan la garanayn
- Istimaaalaan xidhiidhada u dhexeeya erayada si si fiican ay ugu fahmaan erayada
  - Erayo isku macno ah
  - Erayo isku lid ah

## Guudmarka Fasalka 8 | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida

Ardayda fasalka siddeedaad waxay si aad ah ula falgalaan suugaanta iyo qoraalka wargelineed. Waxay isticmaalaan caddayn ka timi xulashooyin si ay u falanqeeyaan aragtida jilayaasha iyo sida qoraagu u isticmaalo hadalka. Ardaydu waxay tixraacaan caddayn qoraal ah si ay u taageeraan falanqayntooda qoraalka waxayna aqoonsadaan sida qaabdhismeedku uu wax ugu daro macnaha iyo qaabka qoraal kasta. Qoraal ahaan, ardaydu waxay muujiyaan xidhiidhaha ka dhexeeya waayo-aragnimooyinka iyo dhacdooyinka.

### Akhrinta

- Isticmaalaan caddayn marka ay samaynayaan gunaanad akhrinta
- Go'aansadaan mawduuc iyo xidhiidhkiisa jilayaasha, xaaladda, iyo sawirka
- Falanqeeyaan sida hadalku u saameeyo natiijada qoraalka
- Aqoonsadaan sida qaabdhismeedku wax ugu daro macnaha iyo qaabka qoraal kasta
- Falanqeeyaan sida fikradda jilayaasha iyo akhriyuhu u abuurto saamayn sida walbahaar ama madadaalo
- Go'aamiyaan jawaabta qoraaga ee aragtiyaha is khilaafsan
- Qiimeeyaan mala-awaalka qoraaga iyagoo loolal galinaya gunaanadyada ila kale oo macluumaadka
- Akhriyaan oo fahmaan qoraalka khayaalka iyo ka aan khayaalka ahayn heerka fasal

### Qorista

- Qoraan doodo si ay ugu taageeraan sheegashooyin sababo cadcad iyo caddayn ku tacaluqda
- Qoraan qoraal wargelin kaasi oo baadha mawduuc oo sharraxa afkaar
- Qoraan sheekooyin kuwaasi oo tusinaya xidhiidhaha ka dhexeeya waayo-aragnimooyinka iyo dhacdooyinka
- Tabiyaan mashaariic cilmi-baadhis oo muujiyaan faham mawduuca la baadhayo
- Isticmaalaan tiknoolaji si ay u soosaaraan una daabacaan qoraal una soojeediyaan xidhiidha macluumaadka iyo fikradaha

### Hadalka iyo Dhagaysiga

- Kaqaybqaataan falanqaynta, hal-halka iyo kooxda
- Aqoonsadaan marka caddayn ku tacaluqda la isticmaalayo sheegashada hadlaha
- Qorsheeyaan oo soojeediaan sheeko
- Isticmaalaan isha-sha u saar, mug habboon, iyo ku dhawaaq cad marka soojeedinta

### Luuqadda

- Isticmaalaan naxe iyo luuqad sax ah
- Isticmaalaan xarfo waawaynayn, xarakayn, iyo higgaadin sax ah
- Isticmaalaan qaabab kala duwan si ay u go'aamiyaan macnaha eray aan la garanayn
- Tarjumaan qaababka hadalka
  - Hadal si kale loo dhigo
  - Ciyaaraha erayada

***[NOTE TO LOCAL EDUCATIONAL AGENCIES (LEAs): As a form of assistance to LEAs, the California Department of Education (CDE) offers this translation free of charge. Because there can be variations in translation, the CDE recommends that LEAs confer with local translators to determine any need for additions or modifications, including the addition of local contact information or local data, or modifications in language to suit the needs of specific language groups in the local community. If you have comments or questions regarding the translation, please e-mail the Clearinghouse for Multilingual Documents (CMD) at [cmd@cde.ca.gov](mailto:cmd@cde.ca.gov).]***